

YouthLink waxay caawisaa dadka dhallinyarada ah, oo da'doodu tahay 13-24 sano, kuwaas oo ay ka haystaan dhibaatooyin xagga caadifadda ama arrimaha bulshanimada. Waxaan nahay adeeg la-talin lacag la'aan ah oo qarsoodi ah, oo ay ka shaqeeyaan shaqaale taageerid iyo waayo-aragnimo leh kuwaas oo soo dhaweyn leh, kuwo aan dadka malayn ee garowsiyo leh. Waxaan kuu diyaarin karnaa turjumaan lacag la'aan ah si uu kaaga caawiyo wada-hadalka, haddii loo baahdana, waan kuu iman karnaa.

Waxaan qadarinaa dhaqannada kala duwan, jinsiga, galmada, iyo iinta (curyaanimada). Tusaaleyaalka qaarkood ee arrimaha caadifadda iyo caafimaadka bulshada oo aan dadka ka caawin karno waxaa ka mid ah: waayo-aragnimada jirdilka, murugta iyo khasaaraha, xusuusaha naftaada waxyeelaya, walaaca, khamriga ama isticmaalka daroogada, carada iyo dagaal-badnida, isku-kalsoonaanta, iyo xiriirka guur ee xumaada.

Intaas waxaa raaca, waxaan kaa caawin karnaa inaad la xiriirtid adeegyada wax caawiya ee kale, waxaan kugu caawin karnaa inaad hesho siyaabaha aad kula xaajoon karto oo ula xiriiri karto qoyskaaga ama dadka kale, waana kuu doodi karnaa.

Waxaan furanahay Isniinta ilaa Jumcaha laga bilaabo 9.00am ilaa 5.00pm, waxaan degan nahay 223 James Street Northbridge, Western Australia.

Haddii aad filayso inaad nala hadasho fadlan ka soo wac Sarkaalka Intake Officer taleefanka 1300 362 569. Haddii kale waxaad ka codsan kartaa qof weyn (adult) oo aad ku kalsoon tahay inuu na soo waco asagoo kuu hadlaya adiga. Fadlan noo sheeg haddii aad doonaysid in lagu diyaariyo turjumaanka taleefanka oo luqaddaada ku hadla.